



Xaqiijin



Haddii aadan haysan dukumeenti sax ah oo ku saabsan deganaanshahaaga hadda, waxaad heli kartaa qof ku xaqiijiyo Maalinta Doorashada.

Qofka ku xaqiijinaya waa inuu ahaadaa codbixiye ka diiwaan gashan xaafaddaada waxaana laga rabaa inuu saxiixo dhaar xaqiijinaysa ciwaankaaga.

Yaase xaqiijin kara

Cod-bixiye diwaangashan oo kula nool xaafadda

- Cod-bixiyaha diwaangashan waxa uu xaqiijin karaa ilaa siddeed codbixiye
- Uma xaqiijin kartid dadka kale haddii qof kuu xaqiijiyay adiga

ama

Shaqaalaha xarunta haddii aad ku nooshahay xarun la degan yahay

- Shaqaaluhu waxay u baahan yihiin inay goobta codbixinta ku tusaan caddayntooda shaqaale (baajka aqoonsiga shaqaalaha ama liiska shaqaalaha).
- Ma jiro xaddidaad inta qof ee xubin shaqaale ah ee ku xaqiijin kara

Haddii ciwaankaaga aan la xaqiijin karin, waxaa laga yaabaa in lagu “lagugu carqaladeeyo” goobaha codbixinta. Weli waad awoodaa inaad codeyso. Garsoorayaasha doorashada ee goobtaada codbixinta ayaa ku dhaarin doona inaad xaq u leedahay.